# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened:- 10:53 AM** **Hansard No.20/3** **Kal-fadhi 20aad fadhiigsa 8aad**

***05/01/2013***

## ***Dooda Xeerka Booliiska oo ka qeyb-qaaten 12 mudane socoteyna maalin kaliya.***

1. **Cabdiraxmaan Cismaan Caalin:-** Bismilaahi raxmaani raxiim mudane shir gudoon iyo mudanayaal xeekani marka hore waxa uu khilaafsan yahay sida gudidu ay soo saartay Qaybo badan oo shuruuc deena hore ah iyo Xuquuda Aadamaha iyo dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka lagaga dhaqmo wuu ka soo horjeedaa, marka labaad waxaa uu khilaaf sanyahay **Qodobka 3aad F/4aad** oo principle ka ah in booliska Somaliland loo habeeyo loona tababaro booliis rayid ah ama waxa loo yaqaano community police inagu maanta uma baahnin state police uma baahnin ee waxan u baahanahay community police oo dadka ku xidhan oo dadka la shaqeeya oo dadku ka amar qaataan oo dadkuna warka u keenaan.

   Markaa wuu khilaafsan yahay Gudiddi aan hawsha u dirsanayna Qodobkaa completely way ka saareen sida lifaaqoodada ka muuqata oo waxay yidhaahdeen looma baahna oo waxay yidhaahdeen community police ayaa loo bahan yahay, marka labaad structure booliiku leeyahay kuma cada meesha waxa uu sheegayaa ahdaafta **qodobka 3aad** ee ah xeerka waxaa looga dan leeyahay in lagu gaadho ujeedooyinka soo socda oo ah in lagu cadeeyo qaab dhismeedka iyo awoodaha iyo waa jibaadka ciidanka, markaa completely structure uu leeyahay ma jirto.

   **Qodobka 3aad** awoodahaa waxaa leh inanka booliska iyo salkaalka ayaa toos uleh waxaa kale oo awoodaha iyo talaaboyinka laga qaadayo iska leh sarkaalka oo go'aankana gaadhaya ee commissions malahan. Waxaa kale oo aan wurarka ku haynaa in aan wasaarada daakhiligu habayaraatee aanay xeer commission kulahayn oo aanay gudideedii golahanu golahan u bandhigin haba yaraatee

   **Waxaan Soo jeedinayaa:-**

   - Markaa waxaa odhan laahaa xeerkan dib ha looga shaqeeyo waxa uu u baahan yahay laba arimood ama ha la siiyo wakhti dheer oo uu daraasaad lagu soo sameeyo, markaa waa in gudidii iyo wasaarada daakhiliga, xeer ilaalinta, iyo maxkamada waa in dhamaantood ay gudidu isugu yeesho si la isu waafajiyo structure, awooda iyo dhamaan wax yaabaha qabyada ka ahba iyo in aan qaadano principle ka community police ka ah, markaa waxaan odhan lahaa xeerkanu maadaama uu wasaaradii daakhiliguna aanay contribution aanay kulahayn sida la noo sheegay oo gudidani kala gabatay in xeerkan dib looga shaqeeyo oo lagu celiyo gudidii oo dhamaan loo wada yeedho booliska iyo xeer

ilaalinta oo dib loo hagaajiyo oo daraasaad lagu sameeyo ayaan soo jeedin lahaa.

2. **Cabdiqaadir X. Ismacil Jirde:-** Bismilaahi raxmaani raxiim Gudoomiyaha xildhibaanada iyo dhamaan martidaba waan salaamayaa. Waxaa weeyi aniga oo ku waafaqsan gudiddu warbixin tii ay ina siisay ee tafatiran tirnayd wax badana aan ka qaatay hadana meelo yar yar oo aan is leeyahay malaha way dul mareen ayaan ka hadlayaa **Qodobka 8aad** waxaa uu sheegayaa in booliiska leeyahay shaqsiyan qaanuuniya oo legal personality ah mar hadii uu legal personality leeyahay waxaa uu yeelanayaa liabilities sida qofka caadiga ama hay'adaha oo kale markaa waxaa uu yeelanayaa liabilities waayo gafbaa laga galayaa gafbuu galayaa waa la dacweynkaraa dayn baa lagu yeelan karaa maxkamad ayaa lala tagikaraa shaqsiyan qaanuuniyan weeyaan.

   Waxaanad moodaa intaa dariiqii loo mari lahaa uu xidhan yahay, **Qodobka 12aad** waxaa uu sheegayaa xafiis baadhineed oo dacwadaha ka dhan ka ah booliska ama hay'adaha booliska in Wasiirka Arimaha Guduhu samayn doono hada maahan wuu sameeyay ama waa jiraa ee waa uu samayn doon xafiis eega dacwadaha ka dhanka ah dee waxaasi xeer maaha. Dariiqii wuu xidhan yahay booliskaa la sugi doonaa qofka booliska dacwad ka qabaa ama wax ka tabanayaa ama hanta ku yeesha ama gaflaga gala waxa uu sugi doonaa inta wasiirku xafiis samayn doono taa waxaan anagu u aragnaa dariiqii oo la sii xidhay.

   Qaanuunku waxaa uu sheegayyaa waa shaqsiya qaynuuniya waayo gafna way galeysaa gafna waa laga galayaa, markaa dariiqu wuu xidhan yahay.

   Ta kale cabashadii booliiska waxaa lagu soo koobay internal control and complement, internal controlna kuma filna waayo dadbuu la macaamilayaa, mujtamicii oo dhan ayay shaqadiisu saamaynaysaa, gafkuu galo hadii layidhaa halagu kobo internal control oo isagu ha is baadho oo isagu ha is xukumo oo dadkii wax sheeganayay loo yeedhi maayee gudi ayaa meel fadhiisanaysa oo iyadaa baadhaysa waana ay nu naqaanaayoo unit kaligii is baadhi karaa majiro **waxaan qabaa** intaa lacadeeyo oo qofka muwaadinka ahi jaran jarooyinka uu marayo iyo halka uu ku aadayo ee aanay ku koobnaan internal unit booliisla gudiisa ah in aanay ku koobanaan.

   Takale ciidamo ayay nu leenahay ciidanka Qaran waxaa la yidhi ninka Wasiirka Gaashaan dhiga noqonayaa waa in uu nin civilian ahaadaa mabda laga leeyahayna maahan ee waa wax la iska jelaystay oo u jeedadeedu tahay in ninka wasiirka ahi aanu macro-management garayn Karin ciidan ka oo aanu ciidan kaa faragalin wasiirku aanu la maamulin taliyaha mabda'aa ayaa ciidan ka loo sameeyay uma qorna booliiska lakiin waa mab'da lagu dhiqi karo. Markaa waxaa muuqata in awooda ugu weyn in taliyahaba uu la wadaagayo taladiiba wasiirku, hadaad eegto awoodaha ay kala leeyihiin hadaad soo qaadato **Qodabka 12aad** oo ka hadlaaaya doorka iyo awoodaha Wasiirka ama wasaarada arimaha gudaha waa maanshaa ALLAAH markaa waxaa meesha ku jira macro-management uu la maamulayo oo uu amrayo ciidanka.

Waxaa ka mida abuurida qaybo ama laamo cusub oo kamid ciidan booliska halkuu ka soo gala Wasiirka Arimaha Guduhu qaybo cusub oo la abuurayo laamo la abuurayo xafiisyo la samayanay saldhigyo la samaynayo halkuu ka soo galaa in uu soo galo maahan waa inaga oo nidhaa wasiirka gaashaan dhigu ha socdo oo ilaa furinta ha maamulo oo xubintii furinta oo ha maamulo, Dastuurkana ma waafaqsanan nidaamkana ma waafaqsana.

Waxaa kale oo ka mida waxaa uu kala talinayaa magacaabista, badalka, iyo xilka qaadista taliyayaasha iyo hogaamada xaguu ka soo galaa shaqadiisa maahan ciidanku sturucture ayuu leeyahay nidaambu leeyahay haykal buu leeyahay taliyuu leeyahay qawaaniintiisa oo dhan ayuu uleeyahay, Wasiirka waxaa la rabaa in uu kaliya wakiil uga ahaado Golaha wasiirada ee aanu ciidanka soo fara galin aanu manage garayn taasi waa taa.

Hadii aad eegto waanan ka hadlay dhanka cabashada uu waxka qaban waayo boolisku cidii cabanaysa hadii ay ku qanci weydo jawaabta uu booliski ka bixiyay waxaa cida dacwonaysaa cabashada u gudbinaysaa wasaarada Arimaha Gudaha oo samayn doonta xasiis u qaabilsan dacwadaa, markaa muxuu noqonayaa xafiiskaasi se awoodiiisu maxay noqon doontaa, xeerka halkuu kaga jiraa waa xoriyad mudlaq la siiyay Wasiirka arimaha gudaha xeerkuna cidna ma siiyo xoriya mudlaqa taasi waa taa.

Waxaan u imanayaa qaabdhismeedka ciidan oo aad moodo in halkan wax yar oo kooban laga soo dhigay  qaab dhismeedaka boolisku waxaa uu ka kooban yahay taliska ciidanka booliska oo ka kooban taliyaha taliye ku xigeenka hogaamo qaybo iyo waaxyo hoosyimaada taliska taliska ciidanka boolisku intaa wuu ka balaadhan yahay oo waxaa uu leeyahay oo talis guud buu leeyahay noocyo ciidan ayuu leeyahay waxaa uu leeyahay units aan maanta cid ka talisa aanu la garanayn waa hadii aan runta ka hadalno oo aan taliyuhu xukumin ee uu Wasiirku xukumo oo  wixii loogu talo galay aan loo isticmaalin oo loo isticmaalo wax yaabo kale.

Ciidankii argagixisada ee ay ahayd in xero gaara yeesho oo cid gaar ahi xukunto oo uu talis gaara yeesho waad aragtaan sida uu maanta yahay waa khalad oo waa in ay xeerka ku taalaa sida uu yahay iyo noocyada uu u qaybsamo iyo sida aya isugu xidhmaayaan cida u talisa cida qoraysa.

Waxaa inoogu qoran dastuurkeen waxaa inoogu qoran ciidan ka qaran ku waa in uu ka koobnaadaa deegaamada oo dhan waana in ay ka fiirsano anoon cidna farta ku godayn laakiin waa in laga fiirsadaa oo aanu inaga hoos-bixin sida loo qorayo sida loo qorayo, loo tababarayo iyo sida loo deegaamaynayo taas intaa ayaan ka baxay.

**Qodobka 19aad** oo ka hadlaaya dalacaadaha oo qayb ka mid ah ayaa waxay leedahay dalacaadaha ciidanka booliska isaga oo tix galinaya jaangooyada iyo ku talo galka miisaniyad waxaa is ka leh taliya ciidan booliska darajadana lama wada bixiyo qaar waxaa leh madaxweynaha ayaa yeelanaya oo isu haya labadiiba isu haya qaar waxaa

yeelanaya wasiirka gaashaandhiga qaarna waxaa yeelanaya Golaha wasiirada daakhiligu waxaa uu ka mid yahay Golaha wasiirada ee shaqo kuma laha.

Hada waxaa soo socda darajooyin markaa taa lafteeda mugdi badan ayaa ku jira qaar ka mida oo aan is aragnay waxay qabaan in ay gudidani bixin karto darajo kasta, dhanqan waxaa loo leeyahay oo aduunaka laga dhaqmaa haduu jananba gaadho waxaa bixinaya madaxweynaha wasiirka gaashaan dhigu janaraal ma bixin karo waxaa kaliya uu uga wakiil yahay Golaha wasiirada waxa kaliya uu bixinayaa proposal ka halkana waxaa dhamaan dalacaadihii oo dhan la siiyay taliyaha mana kala cada wax uu bixinayo ma waxaa uu bixinayaa ma alufle ayuu bixinayaa ma laba alufle ayuu bixinayaa ma xidigle ayuu bixinayaa ma kala cada ma ilaa janaraal ayuu bixinayaa taa lafteedu nin lama sugo ee darajada bixinteedu xeer ayay ku soo baxaysaa xeerkiina wali waa qabyo intaa lafteeda lala sugo meesha way taalaa oo darajada cid bixinaysaa oo nin walba awooda inta uu ku leeyahay ee uu bixin karo iyana waa in ay cadaato oo aanay muhmal ahayn.

Takale masuuliyada danbiyada ee madaniga ah qofka booliisla ha waxaa muqata in aan meshan wax danbi ahiba ugu jirin oo isaga laga kor qaaday oo magdhawgii iyo wixii uu gaystay dawlada la saaray isagana wax ciqaaba oo ku imanaysaa aanay jirin ayaan tii dhawayto uun maahee dhawr maalmood oo hore oo booliska iyo shacabku isu dheceen wax baadhitaana oo ka daba tagay ma jiraan askarigaa xabada riday ma haboonayn in uu rido mise wuu ka qaadi karayay, miyuu ku hadidi karayay miyuu shiishay, ma toos ayuu u toogatay (*miyay ka qaraxday xil cabdiraxmaan cismaan caalin)* miyay ka qaraxday sidaa cabdiraxmanba sheegay cidka daba tagtay ma jirto waa xoriyo mudlaqa askariga markaa la soo daayo hadii aan lala socon oo aan awaamiir la soo siin oo aan instruction la soo siin oo aan la odhan marka ay waxaa iyo waxaasi kaa hor yimaaadaan waxaa samee oo aanay ahayn incremental waxa uu samaynayaa dee waa taa dhacaysa weeyaan.

Wadan keena shaqabka iyo cricis kubaway inala joogayeene maynaan arki jirin dhaawaca iyo dhimashada intaa, dhacax tuurkii ayaa igu darnaa 1982 halkan ka dhacay khasaaraha ka dhacay waxaa ku libin laabmaya khasaaraha ka dhacay Xaafada Axmed dhagax oo kaliya maxaa keenaya waa in aan isweydiinaa haday qawaaniintu qabyo tahay waa in qawaaniinta la qabyo tiro, hadii tababarku ka dhiman yahay tababarka loo kordhiyaa, hadii la helayo rasaastan ay ridayaan ee dhabta ah waa in loogu badalaa tii rabadhka ahayd.

Anuu waxaan isu tiriyaa bahda booliska waayo qoys bilays ah ayaa ka soo jeeda waanan ku ag koray ixtiraamna waan u hayaa hawsha ay hayaan baan ogahay hadana waxaas oo dhibaato ah ayaa jira ee sidoo wax looga qaban lahaa anigoon canbaaraynay booliska anoo ixtiraam u hay ayaan wixii maalintii dhawayd halkaa ka dhacay iyo kiwi horaba ayaan ugu daray ee inaadeeroyaal nacayb boolis laga hadlimaayo ee booliska aan hagaajino oo aynu kala kaxayno oo hada wasiirka iyo taliyuhu waxaad moodaa in ay sinta isaga jiraan afar iyo labaatanka saacadood wuu

agtaagan yahay maxaa agdhigay waar yaadhaheen ninkan ninka aan ka xorayno ilaah baan idinku dhaariyee ina saqadhi horuu isa xoreeyee bal kuwa danbe uun aan ka xorayno wasalaamu calaykum warax matulaahi wabarakaatuhuu.

3. **Md. Maxamud Jaamac Cilmi (Dable):-** Gudoomiye, Mudanayaal waad salamantihiin, Waxyaabaha ugu muhiimsan markey noqoto booliis oo saldhig u ah hadii la waayona lama helayo saldhig uu ka dhaqaaqo ninka booliiska ahi, waxaa ugu horeeya waajibaadka ee loo dirayo oo ah in booliisku leeyahay oo aqoon lana siiyo duruus iyo siminaaro, suuqaa laga soo qabtaa oo inta qori loo soo iibsho ayaa la yidhaahdaa halkaa kagal booliiska.

   Hadaba innaga waxaa inaga dhiman waxa la yidhaahdo desiplineka iyo direysku way wada socdaan labaduba, horta waa inuu fahmaa waajibaadkii iyo xuquuqdii lagu lahaa intaan la odhan qori soo iibso.

   Markaan u soo noqdo Sharcigan Booliiska, sharcigu dastuurka iyo qaanuunka wadanka u yaal waa inuu waafaqaa, waxbadan baan maqalney caagalayaal, caagleysiga waxaa u sabab ah qofka booliiska ahi waxaanu fahansanayn

   - waajibaadkii saldhiga u ah booliiskana ku yahay iyo shaqadii laga doonayay.
   - waxaanu kaloo fahansanayn ciqaabta ku dhaceysa haduu ka gudbo xadka waajibaadka uu ku yahay nin booliisa oo amnigii umada masuuliyadeedu saarantahay.
   - Tan saddexaad akhlaaqiyaadkii lagu dooranayay,

   Waayo shuruud laguma xidhin oo caafimaad, danbi la'aan laguma xidhin, darajo laguma xidhin, akhlaaq laguma xidhin oo qiyaasaadkii booliiska iyo waxaas oo dhan wey ka maqan tahay, qofka marka booliis laga dhigayo inta CID lootago ayaa la eegaa wuxuu danbi galey iyo akhlaaqiyaadkiisa, hadhow baa la odhanayaa waa xag-jir dee markii hore daraasad lagu keenin oo la iska keenay, markaa xeerkan waxaa ka dhiman wixii aasaaska u noqon lahaa qofka askari noqonaya ee laga doonayay ee caafimaadkiisii, akhlaaqiyaadkiisii iyo Cilmigiisii, inaga maanta haysana inamo jaamiciyiin ah, inamadaa inta la qaato oo imtixaan laga qaato oo saajin ama isbatoore markiba

la siiyo, markaa intellengecyga la baro iyo waajibaadka laga doonayo labaro, oo shuruudahaas oo dhan lagu daro sharcigan.

Ninbaa kuu imanaya wuxuu ku odhanayaa booliis baan ahay adna maxaad tahay ninkaas ahay baan idhi, keen waraaqdaadii buu yidhi, waataase adna keentaadii baan ku idhi, mahayuu yidhi, hadaba yaa sharciyad u siiyay awoodo inuu aniga i amro oo ibaadho, isna aanu waraaq haysan, inagoo og in cidwalba suuqa ka iibsankarto dhar kaakiya, koofiyad buluuga iyo kabihii askarta, horta halkaa wey ka maqan tahay.

Tan kaloo ka maqan waa askarigu malaha ID ay number iyo magaciisii ku qoran yihiin oo qofka lagu garto oo markuu danbi galo aan ku garto, hadaba waxaan la yaabey cida waxaan soo qortey ee booliiska ah, waxaa jirta sharciga waa la isla soo qaadaa oo la isla soo eegaa sida shuruucda dawladuhu yihiin oo kale, sharciga aynu dhiganaynaa waa inuu noqdaa mid la shaqeeya wakhtigan aynu joogno iyo mustaqbalkaba, ninka booliiska ah iyo Maxkamaduhu waa inay isku aqoon noqdaan oo ninka booliiska ahi ee maxkamada u diyaar gareynayaa kiiska halkan kuma qorna wax aqoon oo lagu xidhayaa.

Wasiirku dee maaha booliiska waa shaqaale, ninka wax qabanaya ee fulinayaa jananka booliiska iyo sharaakiishii iyo askarigii waa iney kala baxaan Wasiirka, Wasiirku siyaasada Guud buu fulinayaa, wasiirku maaha inuu amar siiyo jananka, ninka masuuliyada loo dhibaa waa in loo daayaa, Markaa Wasiirku waa siyaasada Guud ee Xukuumada u qaabilsan.

Xafiis baa jira cilaaqaadka la yidhaahdo, ma sameynayo Wasiirku xafiiskaa, markaa Xafiiska Cilaaqaadka guud ee caamka ah waa inay lahaadaan jananada booliisku oo dadku u soo dacwoon karaan wasaaraduna waa inay mid lahaataa, oo la helaa hotline labada ku soo dhaca, halkana lagu cadeyaa shaqadiisa.

Darajada waa in qaanuunkan lagu soo daraa oo iyadoo sawiran iyo shuruudaheedii si ay u noqoto mid sharciyeysan oo jirta.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- *Sharcigani Ma dhameystirna, makaa waa in dib loo celiyaa oo sharuucda iyo dastuurka lagu soo fadhiisiyaa wixii ka dhiman lagu soo daraa.*

**4. Md. Ibraahim Axmed Haybe:-** Gudoomiyaha iyo Mudanayaashuba waad salaaman tihiin, wixii aan odhan lahaaba xildhibaanadii iga horeysay ayaa sheegay, **Markaa anigu waxaan soo jeedinayaa:-**

- *Xeerkan waa in la celiyo oo la soo hagaajiyo, lana soo qabyo tiro.*

**5. Md. Axmed Maxamed Diiriye (Nac-Nac):-** shirgudoonka iyo xildhibaanadu way salaaman yihiin, sidaa ibraahim sheegay mudanayaashii horaa dhameeyay, waxaan soo jeedinayaa:-

- *Xeerkan dib in loogu celiyo Guddidii iyo Wasaarada iyo Booliiskii soo sameeyay oo Xeer umada lagu dhiqi karo soo dejiyaan oo keenaan.*

**6. Md. Axmed Ducaale Bulaale:-** Xeerkan wax badan baa ka khaldan oo siyaasada amniga qaranka ma hagayo, waxay ahayd in marka hore siyaasadii amniga qaranka aynu hayno oo Wasiirka Daakhiligu inoo keeno oo inagoo heyna xeerka la inoo keeno, magaranayo waxaan xeerka ka idhaahdo mar hadaanan hayn Siyaasadii Amniga qaranka iyo Meeshuu ku jiheysanyahay, maanta aduunyada waynu ognahay nabadgalyadu category badan bey leedahay, amniguna wakhtigan wadan kaliya kuma koobna oo waxaa jira waxyaabo la iska kaashado oo Gobolka.

markaan xeerkan eegay Wasaarada iyo Booliiska sida la isugu cuna duubey ma minishibiyaa? Waayo Wasiirada Daakhiligu waxay booliiska ku ilaalinaysaa inuu ku dhaqmayo siyaasada Qaranka oo kaliya laakiin qaab-dhismeedka booliiska iyo wixii kale shaqo kumalaha, qodob ka mida wuxuu sheegayaa inaanu booliisku wax siyaasada u adeegin hadana waxaa meesha ku qoran Wasiirka Daakhiliga siyaasi ah, oo ka buuxda, waxa kaloo Xeerku siinayaa Wasaarada Arrimaha Gudaha Awoodihii Madaxweynaha oo ah Commander of Chief Ciidamada Qaranka.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- *In Xeerkan dib loogu celiyo Guddidii keentay oo Golaha laga celiyo, si ay u soo qabyo tirto oo wixi ka dhiman ugu soo daraan.*

**7. Md. Maxmed Jaamac Cabdi:-** waxaan meelo badan ka waafaqayaa soo jeedintii Mudanayashii igahoreeyay ay xeerkan ka taabteen, marka guud ahaan la eego Xeerkan uma qalmo hawsha ama waxa aynu dooneyno uu qabto ama waxaad moodaa inuu ka soo tafgaaban yahay, waxyaabo badan oo inuu ka jawaabo ahayd ayaa ka maqan sida

*Madaxbanaanida booliiska:-* madax banaanida loo baahnaa ee Xubnaha booliiska hawlaha iyo fal-galada uu qabanayo, **Qodobka 12aad** ee Doorka Wasaarada Arrimaha Gudaha, waxaa ku qoran hawshii uu qaban lahaa booliisku inaanu qabin Karin ilaa uu la tashado Wasaarada.

*Kala xadeynta ama kala-ilaalinta qofka booliiska ah iyo dadkii uu u shaqeynayay:-* qofka booliiska ahi waa qof basher ah oo wuxuu doono ahaan noqon kara sida mid dabeecad xun ama akhlaaq xun, markaa waa inay halkan lagu cadeeyaa waxyaabaha kala xadeyn kara ee kala dhowraya.

*Adeegsiga:-* **Qodobka 15aad F/2aad** waxay leedahay xub inay qaataan oo ilaa xadka sharcigu ogolyahay ay adeegsadaan, waa in halkan lagu cadeeyaa, dee wax horjoogsan karaa ma jiraan, markaa waxay noqoneysaa inaynu fasax u siineyno, oo waliba laga reebey waajibaadkii madaniga aha oo la yidhi waajibaadkii madaniga ahaa dawladaa qaadeysa la yidhi, waa inuu is difaaci karaa hadii naftiisu halisgaliso gasho, waa inaanu sharafteyda wax u dhiman ilaa xadka uu soconayo iyana meesha kuma cada, habka xuuraanka iyo dabagalka iyo xadhiga aan waaranka lahayn siduu u adeegsan karaa iyana xeerkan way ka maqan tahay.

La-shaqeynta ama wada shaqeynta booliiskeena iyo Interpolka:- halkan kuma cada waxay xidhiidh la leeyihiin, dalkeena way yimaadaan sideynu ula shaqeyn lahayn taasina halkan kuma cada, waxa meelo badan ku qoran waajibaadka, hadana meelo badan waxaa ku qoran shaqada oo **Qodobka 14aad** Waajibka Booliiskuu kaga Hadley, **Qodobka 30aad** shaqada booliiskaa ku qoran waa in la is waafajiyaa oo la yidhaahdaa Xill ama Waajibka, oo ileyn shaqo ma qabtee noqotaa Waajib ama xil.

**Qodobka 18aad** Qaab-dhimeedka iyo sida Ciidanku isu xukumayo iyana ma cada, sidaa darteed.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- *Xeerkan in dib loo celiyo oo anigu ma qabo, laakiin waxaan qabaa in Guddi madax banaan loo saaro oo ay waxyaabaha ka dhiman ku soo daraan.*

**7. Md. Xamse Maxamed Gaadaweyne:-** shir-gudoon iyo mudanayasha qodobo badan aan angiu odhan lahaa waxaa iiga horeeyay oo aan ku waafaqsanahay Mudanayaasha C/qaadir, Dable iyo C/raxman dheere, waxaa jirta laba waxyaabood oo is diidan, mid inagaa ka masuula waayo waxaynu nidhi waxaynu sameysanaynaa Ciidan oo kuwii aynu khaatiga ka joogney baynu direyskii u xidhney, tababar maynaan siin, wax ku filan maynaan siin, hadana waxaynu dooneynaa ciidan discipline leh oo wax hagaajiya, horta inagu aynu joojino waxyaabaha wax inaga kharibaaya

Tan labaad, waa awoodeena oo hadeynu dooneyno inaynu hore u talaabsano, ingriiskii ciidan buu qoran jirey magaaladana kama qoran jirin ee nin reer baadiye ah oo ad-adag labadiisii go' ee casaa sita, wuxuuna bari jirey waxyaabaha laga doonayo, intaasuuna qabsan jirey, markaa inaga labadaasi wey iska keen dhexgaleen, iminka askarigu ma wuxuu aaminsanyahay Dawlada mise Qoladooda, wuxuu aaminsanyahay qoladooda iyagaa qoriga iyagaa wasteeyay oo recommendation ka soo bixiyay, waxaana lagula soo dardaarmayaa dhib ha noo keenin.

Anigey igu dhacdey oo inan aan adeer u ahay baa nin xabadi kaga dhacdey anigaa la iiyimi oo la xaaley oo inaan arrinkii dhameeyo noqotey, markaa waxyaabahaasi wey inaga kharibayaan waxaan sameysan lahayn, Qodobka 14aad Wasiiru Daakhiligii baa waxaa laga dhigey most powerful man in the public, dee Wasiiraduu la mid yahay waxba kagama duwana, ilaa waxaa la yidhi wuxuu kala talinayaa taliyaha booliiska, ma ciidanka talidiisii baa Wasiirku ka talinayaa, waxaasi waa shaqadii Booliiska mana aha, wasiirku inuu galo shaqadaa.

Maalin kasta, Mudaharaad baa dhaca, dadbaa lagu dilaa oo dhibaato ka soo gaadhaa, sidey u dhacdey la isma weydiiyo ma rasaastuu hoos u dhigey, ma toos buu u toogtey, waa danbi aynu ka galeyno shacabkeenii, hadii dil dhaco waa inaynu isweydiinaa cida khaladka leh iyo sida wax u dhaceen.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- *Xeerkan ma dhama, mana dhowa dib ha loo celiyo, waad mahadsantihiin.*

**8. Md. Axmed Maxamed Kijaandhe:-** horta waxaan isweydiinayay maalin dhoweyd xeerarka aan ansixinaa isbadelka ay sameyan aad iyo aad buu u yaryahay siyaasad ha noqdeen, nolosha ha ahaadeen ama dhaqaalaha iyo horumarka dalka ha noqdeene, waxaa weeye dawlada shaqooyinka ugu muhiimsan ee dawladan loo sameystey, oo ay ka mid tahay inay law and order sameyso, booliisku wuxuu laf-dhabar u yahay law and orderkaa, xeerkani waa mid aad loogu baahan yahay oo muhiima.

Markaa waxaa odhan lahaa muhiimada uu leeyahay, mudanayashu commentska ay sameeyeen waan ku waafaqsanahay, booliiska iyo nabadgalyada iyo sidey u shaqeeyaan dhibaatooyin farobadan baa ka jira, maalin dhoweyd raashin la qeybinayay ayaa booliiska loogu yeedhay, waxaana loogu yeedhay inay nidaamka ilaaliyaan, iyagiibaa cabaar ka dib raashinkii boobey, maalintii dhoweyd wixii dhacey markii loo tagey booliiska ee la yidhi ragii waa la garanayaa, booliiskii laftigisii ayaa difaacayay.

Anigu mid baan ku darayaa, wasiirka arrimaha gudaha awoodo farabadan in la siiyay ayaa ku qoran xeerkan, anigu waxaan odhan lahaa waxaa laga bixi kara civil police baynu nidhi, macnaha uu kaga duwan yahay waxa weeye police council ka kooban generalo ritaayargarobey iyo wasiirka arrimaha gudaha oo council civil ah oo ka ilaaliyaa in abusegareyo lana taliya, inaan xeerkan ku darno ayaa wax ka tareysa dhibaatadaa.

**Waxaan soo jeedinaya:-**

- *Xeerkan oo muhiima inaynu dib u celino oo xeer haboon oo ka danaheena ka turjumaya la soo sameyo,*

**9. Md. Xaashi Xuseen Caabi:-** Gudoomiye waad mahadsantahay, horta waxaan isleeyahay xeerkan inaan booliis looma sameyn, xeerkan waxaa loo sameeyay taliyaha iyo Wasaarada Arrimaha Gudaha, laakiin booliis ahaan looma soo sameyn wixii qaban lahaa sidii ragii hore yiraahdeen, anigu waxaan qabaa intaan xeerkan la keenin booliiska dib loogu noqdo, wuxuu u baahan yahay iyo waxa qabanaya lagu soo daro, ninka booliiska ahi wuxuu u baahan yahay in wax la baro, kuwa danbe ee la qorayona qaab lagu soo xulo markuu qofku booliis noqonayo.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- *In xeerkan dib loo celiyo oo laga soo qeybgaliyo waxna laga weydiiyo dadweynaha, odayaasha Dhaqanka iyo booliiskaba, ee yaan Xeer dejinta uun lagu soo koobin, waad mahadsantihiin.*

**10. Md. Maxamed Saalax Cige:-** shir-gudoonka iyo mudanayashaba waan salaamayaa, wax badan waxaan la qabaa mudanayaashii iga horeeyay ee sheegay in xeerkani inuu leeyahay goldaloolo badan.

Xeerkan markaad magaciisa iyo gudihiisa eegto isma lahaa, oo waad maxaad moodaa inaan wixii booliiska looga baahnaa ama uu yeelanalyo kuma qorna, tusaale ahaan, qodobka ugu horeeya wax booliis ahi kuma qeexna waana xeerkii booliiska, waxayna ahayd marka hore in Xeerka booliiska lagu qeexo si cid kaloo booliis sheegan kartaa oo ahayn u jirin, meelaha qaarkood qeexdimaha la siiyay waxaa muuqata inay xeerarka iska hor imanayaan, oo xeerka ciqaabta guud sida sarkaal ugu qeexan tahay halkan uguma qeexna markaa wuu ka horimanayaa.

waxaad moodaa askari haduu qof la hadlo askarigii gacan ka hadal ayuu sameynayaa, markuu ku xidhayona in inta uu laba dibble kuu qabto, booliiskana kaa looma abuurin, booliisku waa saaxiibka booliiska, xadka sharcigu ogolyahay inuu qofka muwaadinka ah ku soo istaago ama hub u qaato iyo damaanada hadii qofka askariga ah wax la yeelo isaga laftgiih.

**Waxaad soo jeedinayaa:-**

- *Waxaan la qabaa mudanayaasha tilmaamey in dib loo celiyo oo xeer dhameystiran oo ciidanka booliiska hagi Kara, dadweynahana wax u tari Kara la soo sameeyo.*

**12. Md. Maxamed Cumar Jiir:-** Salaamu calaykum waraxmatulaahi waxaan doonayaa in aan taataabto woxogaa aan badnay oo ah erayo ama af soomaali aan ku haboonayn meesha oo af carbi ay ku jiraan waxaan idin xasuusin lahaa in inagu aynu nahay kuwii sixi lahaa ee aynaan noqon kuwa koriya afafka kale oo aan ka dhigno in uu af soomaaligu mudnaanta qaato.

Markaa **Qodobka 3aad** waxaan u arkayaa waajibaad iyo xilal halka masuuliyada la leeyahay waa waxa laga rabo qofka bilayska ah, kolkaa kalimaad inagu aynu leenahay ayay nu is ticmaali karnaa waxanan odhan lahaa kalmadahaa Carabiga ah ama Ingiriisiga ah halagu noqdo oo hala ilaaliyo af somaaliaga oo uu u koro ee aanu u baabi'in.

Markaa waajibaadka iyo masuuliyada dabaqaada iyo moojaan waxay tahaye mooyaane markaa waxaan odhan lahaa **Qodobka 5aad** booliska waxaan u arkayaa Booliisku in aanu noqon hay'ad ka madax banaan totally Dawlada oo ay day to day u madax banaanaadaan weeyaan oo ay inta badan wixii kalana ay la socod siiyaan.

Waxaa kale **Qodobka 5aad f/4aad** waxay odhanaysaa xaalada dagaalka iyo xaalada degdega ah ee booliiska Somaliland waxay ka qeybqaadanayaan difaaca dalka, waa sax inay ciidamada caawiyaan oo shaqada la qabtaan. Anigu halkaas yaan marayaa intaasuun baan dooda ku darsanayaa

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| ---------------------------------------------------------- | --------------------------------------------------. |